

## **Nidaamka Caafimaadka ee MeritCare Sharciga Xuquuqda iyo Wajibaadka Bukaanku-Socodka**

Nidaamka Caafimaadka ee MeritCare waxay taageertaa oo ay daryeeshaa bukaanku-socodka oo dhan si nidaam ama qaab u horseeda nolol sare oo tayo leh. Bukaanku-socodka waxaan ula dhaqanna si sharaf iyo ixtiraam ku jirta. Waxaan siinaa dalabaad ay dalbadaan daryeelka caafimaadkooda.

### **Waxaad Xaq u Leedahay in Aad:**

- Hesho daryeel xishmad iyo naxariis leh.
- Ka filo daaweynta iyo adeegyada ay bixiyaan shaqaalaha MeritCare in ay yihiin kuwa ku raaca sharciga.
- Hesho xubin qooskaaga ama qofka aad dalbato iyo taqtarkaaga sheego woqtiga isbitaalka lagu ogolaadey.
- Gu'aano ka gaar daryeelkaaga ka dib markaad ogaato oo aad kala hadasho qorshahaaga daryeel iyo daaweynba.
- Weydiiso daaweyn ama diid. Xuquuqdaan ma aha in loo isticmaalo hab lagu dalbado daaweyn ama adeegyo takhtarkaaga u maleeyo in aysan muhiim ahayn.
- Sirta, taasoo ay quseyso adiga iyo rikoorka caafimaadkaaga.
- In aad daryeel ka hesho goob aamin ah oo sharaf iyo xishmad aad ku leedahay.
- In aad xur ka ahaato takri fal, daayac, xoog iyo cabsi.
- Xor ka ahaado carqaladeyn ama kuwa kale lagaa kala-sooca ayadoon looga baahneyn aamaankaaga. Lama isticmaali doono nooc kasta ee carqaladeyn ah in si xoog lagaaga helo ogolaansho, edbin, in lagaa gudsado, ama shaqaalaha loogu sahlo.
- Fiiri rikoorkada daawadaada oo halaguu sharxo. MeritCare ayaa kaa caawinaaya ama qofka aad dalbato in uu arko rikoorka daawadaada.
- Diyaari Dardaranka Daryeelka Caafimaadka kaasoo noo sheegi doona go'aamada daryeelka caafimaadkaaga.
- Ku raaf ama ku diid in aad ka qeyb qaadato baaritaan daraasaad. Dalabkaan ma saameyn doono daryeelka caafimaadkaaga.
- In aad daryeel ka hesho shaqaale kuwaas adiga iyo qorshaha daryeelkaagaba garanaaya.
- In aad heysato qof xanuunkaaga ku weydiiya oo aad uga juwaabto.

- In lagaa wargeliyo wargeliyo sharciyada iyo howlaha MeritCare kasoo la xiriira daryeelka bukaan-socodka iyo daaweynta.
- In lagaa wargeliyo sharciyada biilalka iyo habka aad iskaga bixin laheyd biilkaaga.
- Ogsoonow shaqsiyaadka ku daryeela magacyadooda iyo waxa ay qabtaan.
- Takhtarkaaga ama maamulaha MeritCare kala hadal haddii ay jiraan arrin kasta ama welwel. Waxaad kaloo aad waci kartaa Wakiilka Bukaan-socodka ka wac (701) 234-5876 inta lagu jiro saacadaha shaqada (Isniin-Jimce, 8:00 am – 5:00 pm) ama Maamulaha Guryaha saacadaha shaqada ka dib iyo wiikendiga adigoo waca nambarka (701) 234-6000.
- La xiriir Waaxda Caafimaadka ee gobolkaaga:

Waaxda Caafimaadka ee North Dakota	Waaxda Caafimaadka ee Minnesota
600 East Boulevard Avenue	P.O. Box 64975
Bismarck, ND 58505-0200	St. Paul, MN 55164-0975
(701) 328-2372	(651) 201-5000 ama (888) 345-0823 (wacidiisu waa bilaash)

**Waxaa Mas’uuliyad kaa Saaran in Aad:**

- Siiso macluumaadka caafimaadkaaga buuxa oo saxa ah .
- Noo sheegto isbedel kasta ee ku saabsan sida aad dareensan tahay.
- Barato qorshaha dareelka caafimaadkaaga si aad dalab haboon u sameysato.
- Weydiiso su’aalo ilaa si cad aad uga ogaaneysid qorshahaaga daryeel.
- Sameysato go’aamo wax ku ool ah.
- Raacdo daryeelka qorshahaaga.
- Ogaato daawooyinka aad qaadato.
- Bixiso biilalkaaga oo aad ogtahay sida daryeelkaaga loo bixindoono. Ka wac Adeegyada Lacagta Bukaan-socodka (701) 234-2451 haddii aad caawinaadooda u baahan tahay.
- Ogaato magaca takhtarka daryeelka aad ugu tagto.
- Qofka ku dareela aad nuqul Dardaranka Daryeelka Caafimaadka siiso.
- Xishmeyso sirta iyo hantida bukaan-socotada kale.
- Noo sheegto qofka aad rabto in uu ogaado daryeelka caafimaadkaaga iyo macluumaadka caafimaadkaaga